

Somali
Af-Soomaali



Xayawaanada Dalka Finland

Sida bulshada dalka Finland loola dhaqmo xayawaanada

Xayawaanada guri-jogga ah ee dalka Finland waa xubin qoyska ka tirsan

Eyda/eeyaha iyo bisadaha/mukulaalyada dalka Finland waxay badidooda u nool yihiin sidii xubnaha qoyska oo kale, waxaan xayawaanada gurijoogga ah loo dhaqaa si aad heer sare u ah. Xayawaanada gurijoogga ah ee Dalka Finland ugu caadiyeysan waa bisadaha/mukulaalyada, eyda/eeyaha iyo bakaylaho.



Sharciga ayaa amniga xayawaanada ilaaliyo

Dalka Finland wuxuu leeyahay sharciga ilaalinta/amniga xayawaanada oo aad u wayn. Sharciga ilaalinta/amniga waa la tixgeliya, haddii xayawaanada si xun loola dhaqmo tallaabo ayaa laga qaadaa.

Sharciga wuxuu khuseeyaa xayawaanada oo idil. Imminka dib u habayn ayaa sharciga ilaalinta/amniga xayawaanada lagu sameyn doonaa. Hadafka sharciga cusub ee amniga/badbaadinta xayawaanada wuxuu yahay in xayawaanada laga ilaaliyo xannuun iyo rafaad dheeraad ah iyo in ladnaantooda dhaawac loo geysto. Ujeed-dada kale ee sharciga laga leeyahay waxay tahay in sare loo qaadlo heer ixtiraamka xayawaanada iyo in hab fiican loola dhaqmo.

Sida hadba ku xusan sharciga waa in ladnaanta xayawaanada la hubiyyaa ugu yaraan hal mar maalin kasta. Sidaas awgeed, sida tusaale bisad/mukulaal, eey ama shimbir ama xitaa kalluunka quraaradda lama oggola in hal maalin ka badan looga tago kormeerd la'aan.

Sharciga wuxuu faraya in xayawaanka xanuunsan u daryeel helo. Tan kale sharciga wuxuu faraya in haddii xayawaan xanuunsan aan la daryeli karin, kaaso ku sugar xaalad sakaraad, wuxuu faraya in si habboon nafta looga qaado/loo dilo. Qof kasta hawshaas noocaas ah ma qaban karo, sidaas darteed haddii lagu tala jiro in la dilo waa in la hubsado in xayawaanka usan silac ku dhiman. Sharciga waxaa kaloo ku xusan qofka iyo qaabka nafta looga qaadi doono.

Waa in tixgelin loo muujiya hab-dhaqanka xayawaanka

Sharciga waxaa ku qeexan nooca goobaha xayawaanada gurijoogga ah ay ku sug-naan karaan. Sida tusaale eeyga ama bisadda/mukulaasha kumeelgaar ahaan oo kaliya ayay qafis ku sugnaan karaan. Xitaa eeyga silsilad u xiran ama joogo deyrka waa in loo oggolaado inuu bannaanka u baxo.

Sharciga ilaalinta/amniga wuxuu xitaa khuseeyaa xayawaanada loogu talagalay in loo isticmaalo waxsoosaarka raashinka. Xayawaanada noocaas ah waa in wax laga qabto baahiyoododa dabiiciiga ah. Xayawaanada waxaa u degsan nidaamyo kala duwan oo lagu dhaqo hadba noocooda, kaasoo si gaar ah u tixgelinayo baahida xayawaankaas u gaarka ah.

Tan kale sharciga ilaalinta/amniga xayawaanada ee mustaqbilka waxaa ku xusan in wax laga qabto baahida hab-dhaqanka dabiiciga ee xayawaanada. Macnaha hab-dhaqanka dabiiciga ee xayawaanada waxaa weeyaan in xayawaanka la siiyo fursad u ugu dhaqmo hab-dhaqanka dabiiciga kaasoo lagamarraan u ah ladnaantiisa. Sida tusaale shimbirta in la siiyo fursad ay ku duusho iyo in kalluunka inuu u duulo oo uu ka duulo midba midka kale, sido kale eeyga waa in la siiyaa fursad u dibadda ugu baxo maalin kasta.



Xayawaanka gurijoogga ah ma ahan waxyaalaha ilmaha ku ciyaraan; Qof wayn ayaa mar kasta mas'uul ka ah xayawaanada gurijoogga ah iyo daryeelkooda ba.

Xoolaha oo idil waa siman yihiin



XOOLAHOO IDIL WAXAY LEEYIHIIN haybad u gaar ah. Macnaha haybad u gaar ah waxaa weeyaan in xayawaan kasta u leeyahay qiimo u gaar ah, sidoo kale xoolaha oo idil waxay leeyihiin haybad u gaar ah. Qiimaha kuma salaysna heerka aadanaha uga faa'iidysto xayawaanka. Sidoo kale caqliga, cabbirka ama muqaalka xayawaanka saamayn kuma yeeshaan qiimahiisa. Xayawaanka waa in ixtiraam loo muujiyo iyadoo dhinac laga eegin.

Xayawaanka xaaland xun ku sugan waa in la caawino

Haddii aad ka shakisan tahay in xayawaan caawi-naad u baahan yahay, waa inaad tallaabo arrintaas ka qaado.

Annaga ayay maslaxad noogu jirta inaad walwalkaaga nala qaybsato, xitaa haddii aadan hubin in dembilal laga galay iyo in kale. Qiimanayntaas waxay xilsaaran tahay Hay`adda amniga/badbaadinta xayawaanada. Hay`adda ayaaa qiimayn doonto haddii wargelinta tallaabo laga qaadi doono iyo in kale.

Haddii aad ka shakisan tahay in ladnaan ku sug-naanta xayawaanada ay halis ku jirto, la xiriir hay` a-daha sugidda amniga xayawaanada.

Hay`adaha sugidda amniga xayawaanada waa sida tusaale **kormeereyaasha oo ah dhakhaatiirta xoolaha ee Dowladda hoose** iyo **ciidanka booliska**.



**Dhakhaatarka xoolaha ee ah
kormeeraha**

Faahfaahinta xiriirka ee dhakhaatiirta xoolaha ee ah kormeereyaasha ka raadso "eläinsuojelu" ama "eläinlääkäri" barta internetka ee maamulka magaalada /Dowladda hoose ama wac lambarka guud ee Dowladda hoose.



Ciidanka booliska

Warbixin ku saabsan faahfaahinta xiriirka ciidanka booliska waxaad ka heleysaa: www.poliisi.fi/en.

Haddii xaaladda u baahan tahay in si degdeg ah wax looga qabto, wac lambarka gurmadka 112.

Haddii xaaladda u baahan tahay in si degdeg ah wax looga qabto, wac lambarka gurmadka 112. Xaaladaha noocaas ah waxay tusaale ahaan noqon karaan

1. xayawaan halis ugu jiro in fal horornimo/xoog-sheegasho ku salaysan loo geysto
2. xayawaan ku sugaran goob usan ka soo dhaqaaqi karin; ama
3. amniga guud u halis ku jiro, sida tusaale haddii ay dhacdo in ay isku dhaacaan wax iyo moose (waa jaad ugaarta ka mid ah oo ku badan dhulalka qabow).



Haddii aadan garanayn wixii Aad Samayn Lahayd, waxaad Talo Weyddiisataa

- La taliyeha-SEY ee amniga/badbaadinta xayawaanada → sey.fi/elainsuojeluneuvojat;
- Ururka maxaliga ee amniga/badbaadinta xayawaanada → sey.fi/jasenyhdistykset, ama
- Eläinsuojelu-chatten → sey.fi, ku qoran luqadaha af-finish iyo af-ingriisi.



Waxaad si qarsoon la xiriir kartaa la taliyaha amniga xayawaanada, ururada ama Eläinsuojelu-chatten.



Haddii aad la kulanto xayawaan xanuunsan, dhaawacsan ama siyaabo kale u baahan caawinaad waa inaad caawinto.

Keensashada xayawaan guri-joogga ah kahor waa in si taxadarsan looga fiirsado

Kahor inta xayawaanka lagu siin, waa inaad hesho warbixin lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan xayawaanka aad xiisaynayso. Waxaa muhim inaad ogaa-to in haddii xayawaanka aad xiisaynayso u yahay ari/adhi ama keli-noole iyo haddii u yahay maalinle ama habeenle.


Dalka Finland suurtagal ma noqon karto inaad eyda/eyeha iyo bisad/mukulaal ka soo iibsado dukaamada xayawaanada. Qofka markii u la wareegaayo eey, bisad/mukulaal ama xayawaan kale oo gurijoog ah waa in u hubsado in aan laga keenin warshadaha soo saara kuwa yaryar.

Sida tusaale ma wanaagsana in xayawaanada laga iibsado baraha internetka. Xayawaano tiro badan oo laga iibsaday baraha internetka caafimaadkooda ma wa-naagsana. Habka ugu wanaagsan ee guriga xayawaan lagu keensado waxaa weeyaan iyadoo guriga aad keensato xayawaan oo aan hoy haysan. Noocyadaas waxaa ka ba-adigoobi kartaa sida tusaale ururrada amniga xayawaanada ama ururrada caawiya xayawaanada aan hoy haysan.

Fadlan ha ilowin in dhammaan eeyaha dalka Finland ku nool in laga diiwaan geliyo Diiwaanka Eeyaha.

Kahor inta xayawaanka lagu sün:

1. Raadso xog ku saabsan nooca iyo baahida xayawaanka u gaarka ah.
2. Soo ogow halka laga helo xayawaanka gurijoogga ah ee aad xiisanayso.
3. Booqo goobta xayawaanka u ku sugaran yahay kaddib hubso in si fican loo soo dhaqay.
4. Keenso wax kasta oo uu baahan yahay kahor inta xayawaanka guriga aadan keensanin.
5. Marna ha iibsan xayawaan duurka laga soo qabsaday/ugaarsaday.



Dalka Finland waa laga ciribtiray tiro badan ee ah cudurrada faafa

Cudurrada infeekshanada sababa oo aadanaha ka qaadaan xayawaanada, kuwaasoo dalal tiro badan laga helo waa laga ciribtiray Dalka Finland. Haddii loo baahdo hay` adaha ilaaliyo xuduudaha ee dalka Finland waxay sidii dalka loo keeno darteed kaloo kormeeraidu ku sameeyaan xayawaanada gurijoogga ah in tallaalyada ku habboon lagu soo tallaalyad.

Sidii mustaqbilka looga hortago faafinta cudurrada darteed, waxaa muhim ah in hab joogto ah in xayawaanada gurijoogga ah loo tallaalo. Sidoo kale tallaalada waxay lagamarmaan u yihiin ka hortegista faafinta cudurrada xayawaanada iyo wax kale. Sida tusaale fayruuska *parvovirus* badi ahaan waxaa dartiisa u geeriyooda eyda/eeyaha.

Haddii aad dibadda eey, bisad/mukulaal ama wax la mid ah ka keento oo aad dalka Finland keento, waa in laga soo tallaalyad cudurrada qaarkood oo ay ka mid yihiin cudurka waraabow. Eyda/eeyaha oo Dalka Finland waa in lagu daryeelo daawada *Echinococcus tapeworm medication*.

Tallaalyada ka sokoow waa in eyda/eeyaha iyo bisad/mukulaal hab joogto ah goryaanada looga saaro, waa haddii loo baahdo. Deworming, oo macnehiisu yahay ciribtirida deriskunoolaha, waxay kaalin ka geysata kahortegista dhaawacyada u sababha infeekshanada deriskunooleyasha. Dhakhtarka xoolaha kala tasho haddii xayawaankaaga u baahan yahay in gooryaanada looga saaro iyo in kale.

Xayawaanka gurijoogga ah ee xanuunsan waa in uu daryeel helo

Xayawaan xanuunsan waa in dhakhaatarka xoolaha u daryeelo. Maadaama xayawaanada badi ahaan isku dayaan in calaamadaha jirrada ay qariyaan, si fudud mar kasta laguma ogaan karo in ay xanuunsan yahay.

Xayawaanka gurijoogga ah siyabahaan ayuu ku muujin karaa in uu xanuunsan yahay:

1. u fadhiyo qaab qallosan;
2. leeyahay dheecaan ka imaanaya indhaha ama daloolada sanka ama qufacayo;
3. uusan si caadi u dhaqdhaqaqayn;
4. qaniinyo ama xanaaq;
5. miisaankiisa hoos u dhaca ama cuntada diido;
6. uu shubmayo ama matagayo;
7. is xagxagto ama is leefleefo; ama
8. badsado cabbitaanka.



Xayawaanada waa in si fican loola dhaqmo loona carbiyo

Xitaa mallayga/kalluunka xanuun buu dareema.

Sidaas darteed, waa in loo daryeelo oona marna kormeerid la`aan looga tegin, sida tusaale markii qofku u socdaal fasax u baxo. Markii qofku u kalluu-maysanayo waa in u tixgeliya xanuunka iyo istareeska kalluunka.



Xayawaanku si fudud ayaa lagu tababari karaa haddii dhacdada isla sidii lagu soo celceliyo oona abaalmarinta ay leedahay soo jiidasho.

Xayawaanada badidooda waxay wax cusub kuartaan markii ay yaryar yihiin. Sidaas darteed, waa in sida ugu dhaqsida badan ku dha-qaaqda tababarka eeyga ama bisad/mukulaal iyagoo aad u yaryar.



Cabbirka xayawaanka saa-mayn kuma yeesho waaya-aragnimadiisa.

Markii xayawaanada loola dha-qmayo, waa in la hubsado in si ku talagal ahayn loo geysto rafaad ama xanuun.



Haddii aad dhibaato kala ku-lanto markii aad xayawaanka carbinayso, waa inaad tababaraha xayawaanada caawinaad wayddiisataa.

Tababaraha xayawaanada wuxuu xayawaanada tababara isagoo adeegsanayo abalsiin, mana adeegsado dirqis, ciqaab, garaacis ama jiidista xarigga.

Hawl gallada SEY waxaa u hoggaansan maslaxadda xayawaanada

Buug-warbixeekaa waxaa soo saaray SEY Animal Welfare ee Dalka Finland. SEY waa ururka amniga/badbaadinta xayawaanada iyo khabiirka amniga/badbaadinta xayawaanada ee ugu wayn Dalka Finland. Ururka SEY wuxuu muddo ka badan boqol sano safka hore kaga jiray daryelista xayawaanada dalka Finland ku nool.

SEY wuxuu ku dadaalaa inuu ka hortago dhibaatooyinka amniga/badbaadinta xayawaanada iyo in u caawino xayawaanada ku sugar xaalad dhib badan. Hawlgallada Amniga/badbaadinta xayawaanada waxaa ku dhaqaqaq danwadaagayaal ururka xubin ka ah, kuwasoo ka kooban 40 xubnood, 80 la taliyayaal iyo 1 000 qof kale oo ah iska wax u qabsayaal/mutadawicin.